Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad
Documentiga Kulankii 17aad **Taariikhda: 28/04/2014**

Kalfadhga 4aad
Kulankiisii 17aad
Saacada la furay: 10:30 am
Saacada la xiray: 3:25 pm
Guntanka: 156

Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Anisixinta Ajendaha**
3. **Qaybinta warbixintii guddiga gaadiidka dekadaha iyo wadooyinka ee la xidhiidha shirkada shirkada favori**
4. **Gunaanadka su'aal wadareedkii wasiirka amniga qaranka**
5. **Salaada duhur iyo qadada**
6. **Su'aal wadareedka wasiirka arimaha gudaha iyo fedraalka iyo wixii kale ee hawlo ah.**

Shir-guddoonka: Guddoomiye Ku-Xigeenka 1aad ee Golaha shacabka JFS
Mudane Jeylaani Nuur Iikar

Waxaa shirka furay Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Mudane Jeylaani nuur Iikar, waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna akhriyay Xildhibaan Sheekh Shaacir. Kadib, guddoomiyuhu wuxuu sheegay In loo qeybiyay Nuqul kamid ah warbixinta Guddiga Gaadiidka iyo Wadooyinka ee la xiriirta heshiiskii shirkadda Turkiga. Wuxuu Guddoomiyuhu u yeeray wasiirka Amniga Qaranka Mudane Cabdikariin Xuseen guuleed si uu ugu jawaabo su'aalo weydiinta Xildhibaanada.

Su’aalaha Xildhibaanada:

Xildhibaan Cabdilaahi Maxamed Xirsi Wuxuu sheegay in eheladooda la heysto ayna ku xir xiran yihiin Dalka Keenya. Wuxuu weydiiyay in uu faah-faahin ka siiyo dadka ku xiran Dalka Kenya.

Xildhibaan Cabdiraxmaan Suge wuxuu u mahad caliyay Wasiirka in uu ciidanka dalka uu horey u riixaayo dhaqaale ku filana ay heystaan.

Xildhibaan Qoryooleey wuxuu sheegay in ay jiraan dad ay ku tuhmaayaan Hey’adda nabad sugidda oo la soo qabtay kadibna qarax ku dhacay oo xubnahooda ku waayeen maxay tahay mas’uuliyada xumidda ay dowladda ku dhaqantay? Maxay tahay dadka isu soo dhiibay Xukuumadda rabayna iney ka mid noqdaan ciidanka nabad sugidda ? Maxaa keenay iney xoreeyaan Dalka magaalooyinkiisa kala duwan haddana ay maciishada ay sare u kacday?

Jawaabta Wasiirka

- Wuxuu raali galin ka bixiyay su’aalihii shalay la weydiiyay oo badnaayeen mid shaqsi ahaan siisa ah,wuxuuna sheegay in Baarlamaanka uu xaq ku leeyihiin iney kalsoonida ay kala noqon karaan,wuxuuna u sheegay Xildhibaanada in ay badda ilaaliyaan kana ilaaliyaan Burcad badeedda.
- Waxaa jirta in dad fara badan ay ku xir xiran yihiin dalka kenta laakiin aan lagu xadgudbeyn qof aan danbi lahayn, qaarna waaba lasii daayay.
- Qofka lagu dhaawacay degmada qoryooleey waxaan ka war helnay waqti danbe hadana waxaa lagu daaweynayaa isbitaalka Madiino.
- Dad shabaab ah oo gaaraayo 45 qof ay isu soo dhiibeyn Xukuumadda, dadkaas qaar waxay udiridoonaan dhaqan calin qaarka kalena waxay u diridoonaan maxkamadda.
- Deegaanada la xoreeyay mararka qaar in ay soo galaan shabaab way jirtaa waana ku dadaali doonaa.

Jawaabta:Tliyaha

Taliyaha Sirdoonka Soomaaliyeed wuxuu sheegay Bashiir Max'med Jaamac wuxuu sheegay sidii uu Wasiirka Amniga horeyba u sheegay indad Al-shabaab ah ay isku soo dhiibeyn Xukuumadda 18/02/2014 waana lasoo dhaweeyay waxaana la baaray xirfadahooda, kadib iyaga iyo hubkooda waxaa lagu wareejiyay Ciidamada Xooga dalka , Ninka dhaawacmay 30/03/2014 uu ahaa Madaxa Caafimaadka wuxuuna qaraxaasi soo gaaray isagoo la socdo ciidanka Nabadsugidda.

Su'aalaha Xildhibaanada:

Xildhibaan Ibraahin Saalax Deyfallah Wuxuu sheegay qod.35-aad ee Dastuurka uu sheegayo in qofka muwaadinka uusan xernaan Karin muddo 24saac kabadan, haddana ay jiraan dad xir xiran muddo 48saac kabadan, Mas'uuliyadaas cidda yeelaneyso waa kuma?

Xildhibaan Caadil sheegow sagaar waxaad sheegteyn buu yiri in aad waxbadan fashiliseen,waxaa jirta in meelo Muhiim ah laqarxiyey sida Madaxtooyadda ,Maxkamadda iyo UN. Ka. Arinta ID,maxaa kalifay in qof muwaadin ah aad u sa-meysaan ID? Mudane Wasiir ,Maxaad isu casiliweysey maadaama Xildhibaano badan ay ku dhaheyn is Casil?

Xildhibaan Maxamed Cumar wuxuu sheegay mar haddii ay hees-taan gaadiidka Dagaalka iyo Ciidamo Boolis ah ayna ka adkaan waayeen nabaddiidka ,Wuxuu weydiiyey sababta uu istiqaalo u dhiibi la'dahay?

Jawaabta Wasiirka:

Wuxuuna sheegay in qofkasta uu xaq u leeyahay,miyey Hay'adda Garsoorka wax dheeraad ah na siiyaan oo aan ku soo baarno marka qaar qofka danbiilaha ay siidaan Garsoorka.

Wuxuu kaloo sheegay in ay waxbadan fashiliyeen dhagar ay wadeen Al-shabaab. Arinta Baasaboorka wuxuu shee-gay ayago in aysan ku kicin wax sharcidaro ah horeyna aysan u sameynin .wuxuu kaloo sheegay in ay qaateyn qofka in uu helo Warqad Dhalasho kadibna ID la siiyo iyo Baasaboor.

Hay'adaha Amniga Baahidooda weli lama helin wuxuu sheegay in laga qaatey 20% wax-aa laga gooyey 80%.su'aasha nala weydiinayana waxay tahay maxaa wax u qabanweyseen.

Xildhibaan Xuseen Maxamed wuxuu sheegay in ay ogyihiin in Cii-damada Nabadsugida iyo Ciidamadda Boliiska ay marin- habaabiyeyn,mas'uulna aad ka tahay fashilaadaan ma qir sanatahay mise maya? 5tii April 2012, Dowladda Ingiriiska ay digniin Soomaaliya u soo gudbiyeen in weerar xukuumadda ku soo wajahan-yahay mana laga gaashaaman ,haddaba wuxuu weydiiy-ey arintaas dhacdey ee hujuumka ah kuna geeriyoodeyn 35 ruux markii la soo weereray Maxkamadda Cidda Mas'-uulka ka ah? Waxaa kaloo ku xigay UNDP, Safaaradda Turkiga,wuxuu weydiiyey cidda ka mas'uulka ah?

Wuxuu kaloo sheegay in wasiir uu qabtey Shir Amni ah waxaa lagu dilay 2-Xildhibaan , Ambasador Nikolas key wuxuu sheegay in Diplomaasiyiinta Qaramadda Midoo bey ay kala soo baxayaan Soomaaliya,wuxuu weydiiyey ciddaarintaasi mas'uulka ka ah.wuxuu ka codsadey Wasir ka in dadka hortooda isku casilo?

Xildhibaan Isaaq wuxuu sheegay in wadankeyna uu ka jiro dhiba-ato ,waxayna Xildhibaanadda sharaftooda ku jirta in uu Wasiirka iscasilo.

Xildhibaan Cabdi qaadir Sandheere wuxuu sheegay in aan la qalbijibin Ciidamada Qalabka sida ee la aado Wasiirka.wuxuu weydiiyey Xildhibaanadii la laayey dadkii laayey arintoda meesha ay mareyso.

Jawaabta Wasiirka:

wuxuu sheegay in 5 April uusan ahayn Wasiir xilligii uu hayey mas'uuliyadda ay ahayd xilligii ugu dhibka yareyd.Ambasador Nikolas key wuxuu shegay waa guubaabo ah hala shaqeeyo amnigana uu isaga dusha ka saaranyahay. Xil.Marxuum C/Casiis kuwii dilay wuxuu sheegay in qaar la haayo.baaritankana wuxuu soconkaraa muddo 5 sano iyo wax ka badan.

Xildhibaan Cabdalla Boos Axmed wuxuu sheegay in wasiirka uu ku magacaabanyahay wasiirka amniga Qaranka, wuxuu weydiiyey in uu sheego

Cadowga Soomaaliya inta uu u qeybsooma? Sharciga ay ku shaqeeyaan Hay'adaha Ajnabiga ah?In uu u sheego Afarta Gole waxa ay yihiin?

JWB.Wasiirka:
Wuxuu wasiirka sheegay in uusan diyaar u ahayn in uu halkaan ka sheego Caddowgooda. Hay'adda Ajnabiga ay Regisgareeyeen waa Seddex ,sharci goodana waa la hakiyey,wuxuuna sheegey in uu horgeey een Golaha Wasiiradda haddana uu u soo gubindoono Golaha Shacabka. Wuxuu intaa ku daray in Ciidamadda Amisom ay sharci yihiin ayna siiyaan keliya Hay'adaha Ajaaniibta Fiisooyinka.wuxuuna soo jeediyey Golaha Shacabka in imaanka aad loo sugo. Odayaashii lagu laaye y B/Hakaba waxaa loo saarey Ciidan baaritaan ku soo sameeya waxaan u xirxiran ilaa 6 qofood.

Qeybii hore waxay soo xirantay saacadu markay ahayd 01:00 pm

Furitaanka qeybtii labaad ee fadhiga: 1:40 pm

Waxaa fadhiga guddoominayay Guddoomiye ku xigeenka labaad Mudane Mahad Cabdalla Cawad. Waxa uu uga mahad celiyay xildhibaanada adkeysiga ay muujiyeen.

Xildhibaan Cabdullahi Jaamac waxaan masuul ka nahay shacabka Soomaaliyeed, dhibaata badanna ay wadanka ka jirto oo ay ugu weyntahay biyo la'aanta ka jirta gobollada dalka qaarkood. Marka waxaan soo jeedinayaa in la sameeyo roob doon ay hormuud ka yihiin Baarlamaanka iyo Xukuumadda.

Guddoomiyaha ayaa wuxuu sheega in xildhibaanadu ay ka soo codsankaraan guddoonka si hay'ada gargaarka loogu gudbiyo dhibaatooyinka ka jira si ay jawaab uga bixiyaan.

Xildhibaan Cabdirisaaq Baarlamaanka qaraar haka soo saaro masiibooyinka (abaaraha) ka jira dalka.

Guddoonka ayaa faray habdhowraha inuu u yeero wasiirka arrimaha Gudaha Mudane Cabdullaahi Goodax Barre si uu uga jawaabo su'aalaha xildhibaanada. Guddoonka ayaa wuxuu akhriyay mooshinka loogu yeeray wasiirka, wuxuuna sheegay in loo yeeray 15/3/2014 hase yeeshe aysan suurto galin in wasiirka lahelo maanta kahor.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay su'aalaha inaysan shaqsi ku soconin laakin ay noqdaan kuwo kursiga uu haayo ku socota.

Su'aalha Xildhibaanada:

Xildhibaan Cabduqaadir Cabdi Xaashi Mudane wasiir adiga iyo wasaarada wax abiil ah maka sameyseen musiibooyinka jira?

Xildhibaan Cabdullaahi Jaamac Xuseen Sharciga waa la ansaxiyay, madaxweynahane wuu saxiixay.Laakin magacaabis cusub ayaa sameysay marka sharcigee ayaad u cuskatay.Arrimaha abaaraha shuruuc gaar ah ma u leedihiin.

XildhibaanCabdirashiid Xidig Howlgalada dib uxoreynta saameyn ayey dadka shacabka ah ku yeesheen qorshaha dagaalka markii la dajinayey maka qeyb qaadatay? Maxaa sababayin maamulo iska soo horjeedo inaad faraha lagashaan? Miisaaniyadda gobollada uguma jirto maxaad ugu talo gasheen?

Jawaabaha Wasiirka:

- Marka hore wasiirka wuxuu golaha uga tacsiyeeyay xildhibaanadi geeriyoda kadibna wuxuu ugudbay jawaabaha.
- Abaaraha iyo dhibaatooyinka kale abaabul weyn ayaa ugu jirnaa sidi wax looga qaban lahaa. Dalka hadda raashin la'aan kama jirto ee dhibka ugu weyn waxey ka taagan tahay wadooyinka la marin lahaa iyo arrimo amni. Dhanka biyo la'aanta ayana hey'ado badan ayaa la hadalnay.

- Dhanka sharciga wuxuu cabirayaa wadan maamulada jiraan xaalada jirtana sidaas wey ka duwan tahay, marka waxaan sameynay maamulo ku meel gaar ah oo sii abaabula maamul rasmi ah sidi lagu gaari lahaa. Qod 44 xarafkiisa 2aad wuxuu noo fasaxayaa in wixii sharci ah oo laga waayo sharciga loogu noqon doono shuruucdi hore ee dalka. Miisaniyadda gobollada qeyb ayey ku leeyihiin.

Su'aalaha Xildhibaanada

Xildhibaan Aweys Cabdullaahi Ibraahim Maxaa looga tababusheysan waayay waxyaabaha dhici kara kadib markii la xureeyay gobollada qaarkood? Maamulada dalka ka jira kuwee talo ku leheeden dhisidooda noo sheeg? Xeerka aad sheegtay ilaa goormaad sii isticmaaleysaan baarlamaanka ma ogeysiiseen hadaydan ogeysiinine waa maxay sababta?

Xildhibaan Muuse Strategiyada gobollada maamulada loogu dhisayo xagee mareysaa? Kaamka daryeel ee indooleyaasha iyo curyaaminta ayaa booqanay asagoo nawehlinayo wasiiru dowlaha arimaha gudaha marka maxaa laga qabtay xaalada dadka ku jiro kaamkaa? NGO-yada dalka ka jira ma uleedihiin shuruuc lagu dhaqo?Mase jiraan shuruuc hay'adaha samafalka lagu dhaqo oo wasaaradu leedahay?

Xildhibaan Xaabsade Degmoyinka dalka makala fadli badan yihiin, kuwo qaar raashin ayaa geyseen kuwo kalena raashin lama geynin maxay tahay sababta? Gobollada federaalka maxaad qaarna u diideen qaarna u ogolaateen?

Jawaabaha Wasiirka:

- Ciidanka dalka aad ayey dadaal u muujiyeen hadafkii laga lahaa howlgalkana waa lagaaray. Jidadka qaar weli cadowga haraadigiisa ayaa soo galo mararka qaar.
- Arrinta federaalka iyo dib u heshiisiinta wey noo socotaa, wasaaradana maamulada waxey u qabatay lix bilood in lagu sameeyo inta dhiman, laakin laakin golaha barlamaanka ayaa go'aansaday in saddex bilood laga dhigo inkastoo aan u arko in muddadaas ay aad u yartahay.
- Arinta sharciga waxaa rabnaa in asbuuca soo socda aan baarlamaanka usoo gudbino amendments-ks sharciga lagu sameeyay.

- Arinta barakacayaasha wasaarada waxey ka qaadatay kaalin fiican xaalada dadka meesh ku jirana hadda sidii hore wey dhaantaa.
- NGO-yada dalka ka jira wey noo diiwan galsan yihiin waana ka war qabnaa cidii rabtana warbixin waan siinaynaa.
- Raashinka degmooyinka dhan waa loo diray laakin waxaa dhacday in degmooyinka qaar dadki mas'uliyinta ahaa ee rashinkas loo dhiibay in ay leexsadeen, cid kaloo damaanad qaadana waa lawaayay marka waxaan geynay goobihi kale ee noo saamaxday in la geyn karo.

Suaalaha Xildhbaanada:

Xildhibaan Sandheere Maamulka gobolka Banaadir wuxuu badalay inta badan guddoomiyeyaasha degmooyinka gobolka ayadoo la ogyahay in kuwo badan ay wax qabteen. Marka lagu badalayo xagee laga keenay?

Xildhibaan Cabdinasir Gaarane Go'anka Wasiirada ee lagu diiday magacaabista iyo xil ka qaadista aad sameysay maxaad ka aaminsan tahay? Cid aad ka talo galisay majirtaa magacaabidda aad sameysay? Qod.44aad labadiisa farqo ee is burinaya maka warqabtid miyaa sidee u fasiranaysaa?

Xildhibaan Beekos ID-ga waxa ku qoran in uu dhacayo arintaasna wax aan horey u arkay ma ahan marka wasaarada maxay ka leedahay arimahaas? Wasaarada xageey ka kentay inay saddex gobol ogolaato lix gobolna ay diido?

Jawaabaha Wasiirka:

- Guddoomiyeyaasha la badalay amaan weyn ayaa usoo jeedinaya. Laakin qofka weligiis meel majoogayo waa in labadalaa muddo kadib. Dhalin yarada hadda loo dhiibay xilka waxaan ka sugeynaa wax badan in ay qabtaan.
- Xagga goboladana waxaa meel fiican noo mareysa barnaamijka xasilinta dalka.

- Qodboka 44aad ee sharciga waan ognahay in uu is burinayo laakin maadaama la ansaxiyay waxaan qaadanay qeybta anaga nala habooneed
- Daka aan magacaabay latashi badan ayaan ka galay, waxaana latashi badan la yeeshay odeyaal, xildhibaano iyo dad kale oo masuuliyiin ah.
- ID-ga dhicidiisa dalalka caalamka wey ku kala duwan yihiin, tusaale ahaan aniga waxaa muddo ku noolaa dalka Mosambiik aqoonsiga dalkaasna wuu dhacaa muddo kadib. Marka wax dhib ah malaha in uu waqti uu ku dhaco leeyahay. ID-ga hadda waxaan cadeynayaa in aan la bixinin maadaama uu baarlamaanka joojiyay.
- Go'aanka wasiirada ee la xariirta magacaabidda masuuliyinta kala duwan waxay u dhacday sida:
  - Aniga kaliay ayaa haa ku codeyay
  - 8 xubnood wey diideen
  - 14 wey ka aamuseen

  Marka waxaan leeyahay 14-ka ka aamusay waxaan u arkaa iney aniga ila jiraan.

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad, Mudane Mahad Cabdalla Cawad, wuxuu u mahad celiyay wasiirka sida wanaagsan oo uu su'aalaha uga jawaabay, wuxuuna faray in berri oo taariikhda tahay29/4/2014 uu yimaado xilligan oo kale si uu uga jawaabo su'aalaha dhiman.

Gudoomiye kuxigeenka 2aad, Mudane Mahad Cabdalla Cawad, oo shir-guddoominayay kalfadhiga 4aad kulankiisa 17aad ayaa wuxuu ku dhawaaqay inuu xiranyahay Shirka saacadda markey ahayd 3:25 pm.